Walaac muujin ama cabasho soo jeedin

Waxaanu sameyn doonnaa sida noogu wanaagsan si aan u xaqiijinno inaad heshid heerka daryeel ee ugu fiican aad u baahan tahay.
Mar mar, waxaa laga yaabaa in aanay arrin taasi noo fulin ama in aanan gaadhin wixii aad naga filaysay.
Haddii arrintaasi dhacdo, waxaanu ku dadaali doonaa in aanu wax saxno oo aanu wax ka baranno cabashadaadii si aanu u xaqiijino in aanay arrintaasi mar kale soo noqon.

Maxaa dhacaya haddii aan ka walaacsanahay qaabkii la ii daaweyey ama daryeelkii la i siiyey?
Haddii aadan ku farxsanayn daryeelka ama daaweeynta la siiyey adiga ama xubin ka mid ah qoyskaaga, fadlan codso in aad la hadasho hogaamiyaha waadhka ama waaxda ay khuseyso.

Waxaa laga yaabaa in ay arrinta isla markiiba la xaliyo ama in ay kuu gudbiyaan sarkaal sare oo ku takhasusay qaabka dadka buka loo daaweeyo ama agaasinka.

Haddii aadan weli ku faraxsanayn waxaad la xiriiri kartaa Matron oo ka masuul ah waadhka iyo waaxdaba.

Fadlan soo wac xafiiskayaga adoo weydiisanaya in aad ala hadashid Matron ka masuulka ah nawaaxigaas.

Waad la xiriiri kartaa Adeega Talo siinta iyo Xiriirinta Bukaanada (PALS) Si ay kuu caawiyaan.

Muxuu yahay Adeega Talo siinta iyo Xiriirinta Bukaanada (PALS)?
PALS waxay kuula hadlayaan shaqaalaha cusbitaalka. Waxay kuu gudbin karaan Adeega Talo siinta haddii aad u baahan tahay. Waxay kaloo kuu gudbin karaan kooxda cabashada.

Waxaa laga heli karaa dabaqa hoose ee Cusbitaalka Hillingdon.

Adeega waxay bixiyaan saacadaha u dhaxeeya 09:00 ilaa 17.00 Isniin ilaa Jimce:

- Xalinta dhibaatada isla kolkaas.
- Talo iyo macluumaad la xiriira Hayadda.

Faahfaahin Xidhiidh

Email: thh-tr.pals@nhs.net
Cinwaan: PALS, The Hillingdon Hospitals NHS Foundation Trust, Pield Heath Road, Uxbridge, Middlesex, UB8 3NN

Teleefoon: 01895 279973 (mararka qaar fariinta ayuu ku dhacayaa)

Fariintaada waxaa laga jawaabi maalinta xigta oo ah maalin shaqo.

Ka waran haddii aanan ku qanacsanayn jawaab celintii hore ee arrinta walaaca igu haysa?
Haddii aadan weli ku qancsanayn jawaabta aad heshay, waaad xaq u leedahay inaad gudbiso cabasho rasmi.

Tanni sinaba saameyn uguma yeelan karto daaweyntaada cusbitaalka

Sida loo sameeyo cabsho rasmi ah?
Fadlan soo gudbi wax kasta oo la xiriira sida magacaaga iyo cinwaanka, iyo haddii ay suurtagal tahay lambarka cusbitaalka ama taariikhda dhalashada.

Faahfaahin Xidhiidh

Email: thh-tr.complaints@nhs.net
Cinwaan: Complaints Management Unit, The Hillingdon Hospitals NHS Foundation Trust, Pield Heath Road, Uxbridge, Middlesex, UB8 3NN
Teleefoon: 01895 279497/01895 279716

Qarsoodi/Si sir ah
Haddii aad cabashda cid kale u sameynaysid cabashada, waxaan u baahanahay oggolaansho qoraal ah si macluumaadkooda aanu kuula wadaagno (Waafaqsan Xogta Dhawran ee sharciga 1998).

Kolkaanu fiirinayno cabashadaada waxaa laga yaabaa in aanu ka tixraacno diiwaankaaga caafimaad. Haddii aadan doonaynin in aanu saas sameyno fadlan na soo talo geli, laakiin tani waxaa laga yaabaa in ay xadido awoodayada qaabka aanu ula dhaqmayno cabashadaada.

Haddii cabashadaadu aanay la xirririn Hayadayada waxaan kuula xiriiraynaa adeegyada kale ee caafimaadka bixiya sida Adeega aanbalaasta, ama cusbitaalada kale, laakiin kolka hore waxaan u baahanahay oggolaanshahaaga. If your complaint is not just about our Trust we can liaise with other healthcare providers on your behalf, such as the Ambulance Service, or other hospitals, but will need your permission first.

Xagee ayaan ka heli karaa caawimo si aan u sameeyo cabasho?Where can I get support to make a complaint?
Adeega u Doodidda Caboshooyinka ee Hayada Caafimaadka Qaran oo ah adeeg madax banana oo bilaash ah kaana caawinaya siddii aad cabasho ugu gudbin lahayd Adeegga Caafimaadka Qaran (NHS).

Tafaasiil la xiriirta xafiiska kuugu dhow fadlan wac lambarkan 0300 330 5454 ama www.nhscomplaintadvocacy.org

Maxaa dhacaya kolka cabashaadaadu na soo gaadho?
Kooxda u xilsaaran cabasshada ayaa waxay garowsan doonaan in ay heleen cabashadaadii.

Waa laga yaabaa in aanu kula soo xiriirno si aan xog dheeraad ah kaaga helno ama oggolaansho.

Waxaan ka codsanaynaa waaxda ugu haboon in ay baadhitaan ku sameyso waxyaalihii aad soo jeedisay kadibna aanu kuu soo jawaabno.

Ujeedadayadu waa in aanu kugu soo jawaabno muddo 30 casho ah oo maalmaha la shaqeeyo laga bilaabo kolkii aanu warqada helnay cabashada, adoo warqad rasmi ah ka heli doontaa Madaxa Fulinta.

Haddi jawaabtu intaas ka badan qaadato wadahadal baa lagaaga yeelanayaa. Waxaad la xiriiri kartaa waaxda cabashada haddii aad ka walaacsan tahay horumar la’aanta cabashadaada.

Ka waran haddii aanan ku qanacsanayn jawaabta?
Waxaad naga codsan kartaa:

- Qodobada in aanu cadeyno ama inaad na weydiisato war dheeraad ah.
- In la abaabulo kulan lagaga hadlayo walaacaaga joogtada ah. Waxaad keeni kartaa ama soo kaxaysan kartaa qof aad qaraabo tihiin, saaxiib ama qof wakiil kaa ah.
- In dib loo fiiriyo cabashadaada.

Gudiga Baarlamaanka ee Go'aaminta cabashooying Adeega Caafimaadka
Haddii aadan ku faraxsanayn jawaabta kama danbeysta ah, waxaad xaq u leedahay inaad cabashadaada u gudbisid Gudiga Baarlamaanka ee Go'aaminta Adeega Caafimaadka. Adeegaasi waa mid qarsoodi ama sir ah oo weliba bilaash ah, laakiin waxay keliya oo tixgelinayaan haddii aanu anagu six xeel dheer baadhitaanka u sameynay.

Faahfaahin Xidhiidh:

Email: phso.enquiries@ombudsman.org.uk

Cinwaan: Parliamentary and Health Service Ombudsman, Millbank Tower, Millbank, London, SW1P 4QR

Teleefoonka: 0345 015 4033

Website: www.ombudsman.org.uk

Xidhiidhada kale ee muhiimka ah:
NHS Choices
Website: www.nhs.uk/aboutNHSChoices

Ururka Bukaanada
Email: helpline@patients-association.com
Telephone: 020 8423 9111 or 0845 608 4455

Buug yarahan waxaad heli kartaa isagoo maqal ah, far waaweyn ama in lagu tarjumo luuqadaha kale. Fadlan la soo xiriir kooxda cabashada anagaa codsigaaga kaaga jawaabi doona.